Markaad qoraalkan akhrisato waxaad qaadday tallaabadii u horraysay ee aad ku heli lahayd nabad gelyo gurigaaga adiga iyo carruurtaadu. Tallaabada xigta waa inaad caawimaad weydiisato hay'adaha hoos ku xusan:

Ilaha Wax Laga Raadsado (Resources) :
Lambarka Taakulaynta Deg Degga Ah EE Dagaalka Qoyska EE Dalka
"National Domestic Violence Hotline"
1- 800-799-7233
Haddii aad dhaga culustahay oo aad af Ingriiska taqaanno wac: 1-800-787-3224

Tilmaamo: Qof afka Ingriiska ku hadlaya ayaa telefoonka kaa qaban. Luuqadda aad ku hadasho iyo Dalkaad ka timid sheeg, oo dhowr daqiiqo sug si laguugu xidho turjubaan.

Fadlan qor liiska hay'adaha dagaankaaga:

Qoraalkanu wuxuu ku qoran yahay afafka : Carabi, Armeniyan, Boosniyaan/Koreeshiyan, Kamboodiyaan/Khamar, Shiino, Daari/Faarsi, Hamong, Kurdish, Looshan, Ruush, Soomaali, iyo Fiyetnaamiis. Si aad u dalbato wac Waaxda Caafimaadka ee Kalifoorniya (916) 322-2087.

Qoraalkan waxaa dib u habeeyey soona saaray California Department of Health Service, Refugee Health Section, iyo Domestic Violence Prevention Program, Shaqaalaha Caafimaadka Qaxootiga ee Los Angeles, iyo Dagmooyinka Merced, iyo xafiiska Catholic Charities ee San Diego. Qoraalkii ugu horeyay waxaa qoray AYUDA, Inc.,iyo Family Violence Prevention Fund. 6/99

(Somali)

Qofna Xaq Uma Laha Inuu Wax Ku Yeelo, Xataa Qof Aad Jeceshahay :

Su'aalo Iyo Jawaabo Loogu Tala Galay Haweenka Qaxootiga

Dagaalka Qoysku waxa weeye marka ninkaagu, ninkaagii hore, ama saaxiibkaa (gurigaaga kugula nool) wax yeelo jidhkaaga ama niyadaada, maalinba maalinta ka dambaysa ama todobaadba todobaadka ka dambeeya. Dalka Maraykanka Dagaalka Qoysku waa **"dambi"(crime).** Wuxuuna dhacaa haddii isagu:

- Kuu hanjabo ama ku gaadhsiiyo dhaawac
- Kugu khasbo inuu kuu tago marka aadan adigu rabin
- Kaa celiyo inaad dhakhtar u tagto
- Burburiyo alaabtaada guriga, dilo xayawaankaaga guriga, jabiyo shay khaas ah ood jeceshahay, iwm (iyo wixii la mid ah)
- Lacagtaada u taliyo, kaa celiyo inaad saaxiibadaa iyo reerkaaga aragto
- Kuu diido inaad gurigaaga ka baxdo

Haddii Aan Khatar Ku Jiro, Maxaan Samayn Karaa?

- Kaalmada degdegga ah waco, 911 oo u sheeg qofka kula haddla luuqadda aad ku hadasho
- U kac **"hoy" (shelter)**. "Hoygu" waa meel nabad gelyo ah, sida guri weyn, oo adiga iyo carruurtaadu seexan kartaan waxna ka cuni kartaan. Hoy yadu inta badan waa lacag la'aan waxayna badanaa hayaan xogta adeegyada kale ee bulshadaada.
- U tag saaxiib ama qof ka mid ah reerkaaga laakiin cidna ha u sheegin meesha aad joogto.
- Wac Hay'adii ku keentay Dalka Maraykanka. Weydii sida aad ku heli karto kaalmo sharci .

Haddii aad gurigaaga ka tagto, ku dadaal si kasta oo aad carruurtaada u qaadan karto. Haddii aad karto, qaado :

- Laysanka wadidda gaadhiga ama warqadda aqoonsiga
- I- 94 ama Kaarka Cagaaran (Green Card)
- Qoraalka xisaabta bangiga, buugga rasiidka, buugta bangiga
- Warqadaha Dhalashada, Shahaadada Guurka
- Warqadaha Kaalmada, Warqadaha Caafimaadka, iyo warqadaha Raashinka
- Dukumentiga waaxda socdaalka oo dhan
- Kaarka diiwaan gelinta bulshada (Social Security Card)
- Dawooyinka

Mida kale, dhigo lacagtaada meel qarsoodi ah, isla meeshaa dhigo fure dheeraad ah iyo dhar dheeraad ah oo aad ku bedelatid.

Haddii aadan heli karin dukumentiga ama koobigooda, warqad ku qoro xogta ku qoran dukumentigaaga. Waxyaalahaa boorso ku rido si markaad tegeyso aad degdeg ugu hesho. Waxaa kale oo aad dukumentigaa dhigan kartaa guri saaxiib.

Booliska Miyaan Wacaa?

Haa. Dagaalka Qooysku waa **"dambi" (crime).** Boolisku waxay kuu geyn karaan reerkaaga, ama guri saaxiib, ama meel nabad gelyo ah sida hoyga. Haddii boolisku rumaysto in dambi dhacay, way xidhi karaan ninkaaga ama saaxiibkaa. Haddii aanu sarkaalka boolisku luuqadaada ku hadlin, raadso qof aan ilmahaaga, ninkaaga, ama saaxiibkaa ahayn oo kuu turjuma.

Mar walba weydiiso sarkaalka boolisku inuu qoro **"warbixin dhacdada" (incident report)**, taas oo qeexaysa wixii dhacay (waxa kugu khasbay inaad Booliska wacdo). Weydiiso **"lambarka warbixinta dhacdada"**si aad u hesho koobi warbixinta. Waxaa kale ood weydiisataa, qorataana magaca iyo lambarka (lambarka aqoonsiga sarkaalka booliska) aqoonsiga sarkaalka warbixinta qoraya.

Haddii ninkaaga ama saaxiibkaa loo taxaabo rugta booliska, waxaa lagu soo dayn karaa inuu guriga ku soo noqdo muddo yar oo ku siman laba saacadood. U isticmaal waxkhtigaa inaad ku hesho meel nabad gelyo ah oo aad tagto.

Sideen Isu Ilaalin Karaa Mustaqbalka?
Ka fikir inaad hesho " **xukun nabad gelin" (protection order).** Xukunka nabad gelinta waxaa kale oo loo yaqaanaa **"restraining order"** ama **"injunction".** Waxay ka reebaysaa qofka ku dulmaya in aanu kuu soo dhowaanin adiga, carruurtaada, iyo dadka kale ee qoyskaaga ah. Waxaa kale oo aad codsan kartaa in ninkaaga ama saaxiibkaa laga saaro gurigaaga iyo inaanu fara gelinin xaaldaada waaxda socdaalka. Si uu xukunka nabad gelintu u shaqeeyo, waa inaad diyaar u tahay inaad booliska wacdo si ay amarka u hirgaliyaan.

Xukun Nabad Gelin Ma Heli Karaa Xataa Haddii Aanan Waddani Ahayn?
Haa. Uma baahnid inaad waddani noqoto ama degganaansho rasmi ah haysatid inaad hesho xukun nabad gelin. Garyaqaan waa uu fiican yahay inaad heshid balse waa laga maarmi karaa. Waxaad codsi ka qaadan kartaa maxkamadda, Hoy yada haweenka, xafiisyada adeegga sharciga, iyo rugaha booliska qaarkood. Xogta xukunka nabad gelinta maxkamadda ee meesha aad daggan tahay kala xidhiidh: (1) **"garyaqaan adeegga sharciga"** (garyaqaan lacag la'aan ugu adeega dadka dakhligoodu yar yahay), ama (2) hay'adii dalka ku keentay, ama (3) barnaamijyada taakulaynta qaxootiga ee dagaan kaaga.

Sideen Degganaansho Rasmi Ah Ku Heli Karaa Kaalmada Ninkayga La'aantii?
Go'aanka (sharciga) ka hortagga dilka dumarku (VAWA) wuxuu abuuray dariiqyo ay dumarka aan sharciga lahayn ee ay qabaan waddaniyiintu ama kuwa degganaansho rasmi ah leh ay ku heli karaan degganaansho. Intaad ka sugi lahayd in ninkaagu kaaga dalbo dagganaasho hay'adda socdaalka iyo waddaniyeynta (INS), adiga ayaa lafahaaga iyo carruurtaada u dalban kara. Arrintaa waxaa la yidhaahaa "codsi shakhsiyeed". Waa inaad haysataa koobi caddayntii war bixintii booliska ee dagaalka qoyska. Ninkaagu hawshaa door kuma laha, loomana baahna inuu ogaado inaad dalbanayso degganaasho rasmi ah. Sharcigu wuu adag yahay.

Warayso shaqaalaha hoyga, garyaqaan, hay'adda socdaalka, ama mid ka mid ah hay'adaha buugan xagiisa dambe kuqoran inta aadan u tegin hay'adda socdaalka. Waa inaad xaas tahay (lagu qabo) si aad codsi shakhsiyeed u samayso. Degdeg garyaqaan ula xidhiidh haddii aad waraaqo furriin ka hesho ninkaaga.

Haddii ay hay'adda socdaalku ku xidhay oo aad ku jirto "Hawsha Saaridda" (ee horay loogu yaqaannay masaafurinta), waxaad fursad u heli karta inaad codsato sii deyn. Waa inaad haysataa warbixintii booliska ee dagaalka qoyska.

Ninkaygu Wuxuu Iigu Hanjabaa Inuu Carruta Iga Qaadan Haddii Aan Ka Tago. Maxaan Samayn Karaa?
Haddii uu ninkaagu ama saaxiibkaa kuugu hanjabo inuu carrurta kaa qaadan ama dalkiisii u kaxayn, waa inaad taakulayn raadsato adiga oo isticmaalaya tallaabooyinka soo socda :

1. Doono **"Xukunka Haysashada Carruurta" ("custody order",** Dukumenti sharci ah oo ku siinaya xuquuq inaad carruurtaada haysato). Xukunkaasu wuxuu ka joojinayaa ninkaaga ama saaxiibkaa inuu carrurta ka saaro maraykanka.
2. Xukunka haysashada carrurta u dir wasaaradda arrimaha dibadda ee Maraykanka si aad uga joojiso inaanu fiiso (visa) ama baasaboor ugu qaadin carrurta. Waxa kale oo aad koobi u dirtaa safaaradda Maraykanka ee ku taalla dalka ninkaaga ama saaxiibkaa.
3. Sii koobi xukunka iskuullada carrurtaadu dhigato. U sheeg shaqaalaha Iskuulka inayna carrurtaada cid aan adiga ahayn u dhiibin.

Sideen Dhaqaale Ahaan U Masruufi Karaa (daryeeli karaa) Naftatayda Iyo Carruurta Haddii Aan Ninkayga Ka Tago?
Sharcigu wuxuu farayaa ninkaagu inuu carruurta dhaqaale ahaan koriyo iyada oo aan la tixgalinaynin xaaladda socdaalka. Tani waxay khusaysaa xataa haddii aydaan wada noolayn, ama xataa aydaan weligiin is guursanin.

Waa inaad la xidhiidho garyaqaan waaxda socdaalka ama hay'addii ku keentay si aad u ogaato qaabka lagu helo taakulaynta carruurta Kaalifoorniya. Haweenka la qabo qaarkood ayaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan inay taakulayn dhaqaale oo dheeraad ah ka helaan ninkooda. Haweenka qaxootigu waxay isticmaali karaan I-94 kooda si ay u caddeeyaan inay ka shaqaysan karaan waddanka.

Waxaan Ahay Qaxooti. Xaq Ma U Leeyahay Inaan Qaato Kaalmo (Welfeer) Iyo Caafimaad (Medikaal)?
Shanta sano ee u horraysa markaad Maraykanka soo gasho kaddib, waxaad xaq u leedahay kaalmada raashinka, kaalmada ku meel gaadhka ee qoyska caydha ah, caafimaadka, iyo barnaamijo kale oo taakulaynta dadweynaha, sida uu xaq ugu leeyahay waddaniga Maraykanka ah. Qaxootiga intiisa badan ee joogtay dalka shan sano iyo ka badan wixii hadda ka dambeeya xaq uma yeelan doonaan kaalmada raashinka. Xaq u yeelashada kaalmada caafimaadka, kaalmada ku meel gaadhka ee qoyska caydha ah, iyo kaalmada guud ee qaxootiga shan sano iyo kabadan dalka joogay ee gobolada dalku way kala duwan tahay. Fadlan wareyso garyaqaan arrimaha hay'adda socdaalka ama hay'addii dalka ku keentay.

Carrurtayda Dhalashada Maraykanka Leh Xaq Ma U Leeyihiin Xuquuqda Dadweynaha Iyo Caafimaadka?
Haa. Carruurtaada dhalashada Maraykanka leh xaq way u leeyihiin taakulaynta dadweynaha sida cid kasta oo dhalasho maraykan leh carruurtoodu ay xaqa ugu leeyihiin.

Miyaa La I Masaafurin Haddii Aan Arrimahan Mid Kamid Ah Sameeyo?
Haddii aad Maraykanka joogto oo aad haysato dukumenti sharci ah, laguma masaafurin karo haddii aad ka dacwooto dagaalka qoyska. Waa lagu masaafurin karaa haddii aad dukumenti been ah haysato, haddaad dambi gasho, ama aadan fulinin shuruudaha fiisadaada.

Ninkayga Ama Saaxiibkay Miyaa La Masaafurin Haddii Aan Tallaabo Qaado?

Haddii aad taakulayn ka hesho hoy ama garyaqaan, uma badna in ninkaaga ama saaxiibkaa la masaafuriyo.

Haddii aad booliska wacdo oo ninkaaga ama saaxiibkaa la xidho oo dambi lagu xukumo, isaga waa la masaafurin karaa, iyada oo ay ku xidhantahay xaaladdiisa hay'adda socdaalka iyo dambiga noociisa.

Badbaadi Naftaada iyo carruurtaada.

Xusuusnow, dagaalka qoysku inuu yahay dambi.

Waa muhiim inaad caawimaad doonato.